



Dirsashada Codsiyada Barnaamijka Kaalmada Sugnaanta Cuntada ee King County | Wuxuu ku egyahay December 8, 2021

I. Asalka

Ilaa inta uu bilowday caabuqa COVID-19, heerarka cunto yarida Puget Sound ayaa aad u kordhay. 2020 kii, intii lagu guda jiray xaaladihii ugu darnaa, tirada qoysaska ku nool King County oo soo sheegaya cunto yarida ayaa laba laabmay, khuburada deegaanka ayaana sheegaya in korarka heerka cunto yarida ay sii ahaan doonto mid sareysa dhamaadka cudurka.

Daraasaad ay sameeyeen jaamacadaha 'University of Washington' iyo 'Washington State University' ayaa muujinaya kala duwanaan la'aan dhanka helitaanka cuntada dowlad deegaanka oo idil iyo King County, ee qoysaska dhaqaalahooda hooseya, qoysaska caruurta qaba iyo dadka midabka oo la kulmaya gaajo heer daran oo aan munaasab ahayn. Waxaa jiro shabakado ururo ah oo adag oo ka caawiya macaamiisha helitaanka barnaamijyada kaalmada ah ee dawladda fadaraalka iyo nidaamka cuntada degdega ah, waxay soo ogaadeen inay jiraan dulduleelo dhanka helitaanka cuntada, gaar ahaan bulshooyinka sida daran dhaqaalahooda uu u saameeyey COVID-19.

Si loo muujiyo dulduleedan ka jira dhanka helitaanka cuntada, United Way of King County ayaa kaashatay Waaxda Caafimaadka Dadweynaha – Seattle & King County inay qeybiyaan \$4,400,000 qarashka fadaraalka iyagoona marinaya lacagaha Barnaamijka Kaalmada Cuntada ee 'Food Security Assistance Program'. Maalgelintan waxaa la siiyey King County oo loogu soo darey lacagtii aheed 'Coronavirus Local Fiscal Recovery fund', oo kamid ahayd 'American Rescue Plan Act'. Waaxda lacagaha ee Mareykanka ayaa bixisay tilmaamo fadaraali ah oo u saabsan waxyaabaha loo ogol yahay in loo isticmaalo lacagaha, sidookale King County ayaa siisey United Way tilmaamo iyo xakameyn dheeri ah. Qaabka Barnaamijka Caawinta Cuntada ee 'Food Security Assistance Program' waxaa loo sheegay qaab ay bulshadu ogtahay oo ay hogaaminayaan Waaxda Caafimaadka Dadweynaha – Seattle & King County sanadka 2020 iyo 2021.

II. Ujeedada Barnaamijka

Ujeedada Barnaamijka Kaalmada Cuntada ee 'King County Food Security Assistance Program' waxay tahay in la kordhiyo helitaanka cuntada lagama maarmaanka ah ee bulshada dhibaataysan oo sida daran uu u saameeyey COVID-19. Qarash bixinta iyadoona la marinayo qaabka caawinta cuntada ee 'Food Security Assistance Program' ayaa loogu talagalay in lagu xajiyo ama lagu miisaamo mashaariicda muujinaya dulduleelada helitaanka cuntada ee ka jira King County.

Iyadoo la adeegsanayo barnaamijkan, United Way of King County waxay qandaraas la gali doontaa ururo bulsho, kuwa cunto, shirkado raashiin iyo is-bahaysiyo si joogta ah uga shaqeeyey hal ama wax ka badan oo barnaamijyo cunto ah ugu yaraan mudo 12 bilood ah. Waxaana kamid ah:

- **Kuwa qeybiya qudaarta**, guryaha geeya, xiriir la leh goobaha cunto qeybinta ama shirkadaha raashiinka
- **Kuwa qeybiya cuntada** oo guryaha geeya ama qaab barnaamijyo ah Qaado oo Sii Soco

Ururada waxaa laga raba ugu yaraan 75% qarashka inay ku bixiyaan raashiin. Ugu badnaan 25% oo qarashka ah ayaa la raba in loo adeegsado bixinta mushaarka, faa'idada' keenista' iyo qarashaadka dadban. Iibsashada kaararka hadiyadaha, foorjarada raashiinka, iyo alaabta sida (farantijeero, qabaajiyayaal, gawaari, kuwa wax lagu keydiyo iwm looma ogolo barnaamijkan. Barnaamijka kaalmada cuntada ee 'Food Security Assistance Program' ma maalgelin karo dhismayaasha maamulka, mashaariicda rasal-maalka, wuxuuna u baahan yahay qiimeyn ama mashaariic qorsheysan.

Lacagaha waxaa loo bixin doonaa sidan soo socota:

Qeybta 1aad: Ururada Gaarka ah

Qeybtan waxay u furan tahay ururada bulshada oo xooga saara helitaanka cuntada ee bulshada uu sida daran u saameeyey COVID-19, iyagoona u qeybinaya qaab dhaqan wanaagsan iyo mid cunto wanaagsan.

United Way of King County waxay qandaraas la gali doontaa ururo raashiinka u qeybinaya:

- Bulshooyinka horey u waayeen barnaamijyada kaalmada raashiinka degdega ah ama barnaamijyada kaalmada fadaraalka oo ay ku jiraan kuwii ay sheegeen jaamacadaha, [University of Washington and Washington State University WAFOOD study](#)
- Bulshooyinka aanan waxbab ka helin barnaamijyada kaalmada cuntada ee dawladda
- Mashaariicda loogu adeego dadka dhaqaala ahaan dhibaataada heysata oo ku nool deegaanada ay ka jirto dulduleelada helitaanka cuntada

Ururada gaarka ee hoos taga qeybtan waxaa qasab ah inay lahaadaan waxyaabahan soo socda:

- Taariikh ah isdhaxgalka bulshada iyo awood ay ku soo saaraan oo uga jawaabaan falcelinta bulshada
- Khibrad dhanka soo iibinta iyo qeybinta cunto haboon dhaqan ahaan iyo dheeli-tiranaan leh
- Khibrad ku saabsan cunto qeybin joogto ah iyadoo la raacayo qaabab raqiis ah
- Fahan wanaagsan oo ku saabsan sida daran oo COVID-19ka u saameeyey kuwa bulshada kamid ah oo ay u adeegayaan

United Way waxay shaqaaleysiin doontaa 20 ilaa 25 urur, waxayna u dhiibi doontaa lacag u dhaxeysa \$150,000 ilaa \$250,000. Si loo hubiyo faylalka ururada sida wadajirka ugu shaqeeya kooxaha bulshada ku nool King County oo sida ba'an u cunto yarida u saameysay, United Way ayaa rajeyneysa inay lacagaha u dhiibto ugu yaraan:

- 1 urur oo raashiinka u qeybiya North King County

- 2 urur oo raashiinkau qeybiya East King County
- 5 urur oo raashiinkau qeybiya City of Seattle
- 7 urur oo raashiinkau qeybiya South King County iyo King Countyga aan laga maarmin

Qeybta 2aad: Is-baxaysiyada

Qeybtani waxaa loogu talagalay in lagu taageero is-bahaysiyada samaynaya qaababka cunto qeybinta cajiibka iyo hal-abuurka ku dheexan si loogu adeego bulshooyinka uu sida daran u saameeyey COVID-19. Tani waxaa qeyb ka noqon kara barnaamijyada waaweyn ee cunto keenista guryaha, iibsashada weyn ee cuntada iyo qudaarta dhaqanka u ah ama cuntada iyo iskaashatada ka wadashaqeeya bixinta cuntada degdega ah iyo ururada bulshada.

United Way of King County ayaa lacag siin doonta is-bahaysiyada ka shaqeeya arimaha bulshada sida weyn uu u saameeyey COVID-19 kuwaas oo laga hela mid kamid ah astaamahan soo socda:

- Mashaariicda u adeega dadka dhaqaala xumada saameysay oo ku nool deeganada lagu soo sheegay dulduleelada helitaanka cuntada, oo ay kamid yihiin laakiin aanan keliya ku koobneyn South Seattle, South King County iyo goobaha baadiyaha ah iyo goobaha aanan laga maarmin ee ka tirsan King County.
- Bulshooyin kala duwan oo leh dhaqamo kala duwan iyo dooqyo cunto kala duwan oo cajiib ah.
- Bulshooyin leh baahiyo cunto gaar ah.

Is-bahaysiyada ka kooban labo ama wax ka badan oo ururo ah waxaa lagu dhiiragelinayaa inay soo codsadaan hadii ay buuxin karaan shuruudahan soo socda:

- Khibrad ah ka wada shaqeynta is-bahaysi ahaan dhanka barnaamijyada cuntada
- Khibrad shaqo oo gaarsiisan heerka nidaamka lagu ogaan karo dulduleelada helitaanka cuntada
- Rabitaan iyo awood lagu soo saaro, looga jawaabo falcelinta bulshada
- Cadeymo ku saabsan soo bandhigista qaababka ugu dhibka yar ee helitaanka cuntada
- Khibrada bixinta cuntooyinka gaarka u ah dhaqamada
- Khibrada helitaanka cunto la iibiyo ama la sadaqeeyo taas oo dhaqanka waafaqsan oo cunta ahaanna u wanaagsan
- Kartida in si degdeg ah lagu soo iibiyo loona qeybiyo cunto fara badan (\$30,000 ilaa \$40,000 ee cunto la soo iibinayo bil kasta mudada qandaraaska)

United Way ayaa shaqaaleysiin doonto ilaa afar is-bahaysi oo ay ugu badnaan siin doonto mid kasta lacag gaaraysa \$500,000. Xubnaha shaqsiyaadka ka tirsan is-bahaysiga waxay hoos tagi doonaan qeybta 1aad dhinaca lacagaha (Ururada Gaarka ah) hadii codsigooda uu metalayo shaqo ka madax banana mida lagu maalgeliyo codsiga is-bahaysiga.

United Way ayaa qarashka u bixin doonta qaab mudnaanta siinaya danaha dadka dhibaataada daran soo gaartay ama nidaamyada aanan helin lacago ku filan waxayna ujeedadu tahay in qandaraas lala galo is-bahaysiyo badan oo si wanaagsan oo guud

ugu shaqeyey deegaano iyo bulsho ka tirsan King County kuwaas oo sida ba'an cunto yarida u saameysey.

III. Tirada lacagta iyo Mudada

Barnaamijka Kaalmada Cuntada ee 'Food Security Assistance Program' ayaa siin doona ururada bulshada, mashaariicda cuntada, bangiyada cuntada ama shirkadaha cuntada iyo is-bahaysiyada lacag kamid ah 'American Rescue Plan' oo gaaraysa \$4,400,000. Fadlan ogoow mashaariicda la bixiyey ma lahaan doonaan miisaaniyad isku mid ah codsadayaasha qaar ayaa la siin doonaa keliya qeyb kamid ah lacagta.

Mudada qandaraaska waxay noqon doontaa 15ka Janaayo, 2022 ilaa 31ka Oktoobar, 2022.

IV. Yaa soo codsan karo:

Waxaan ku dhiiragelinaynaa inay soo socdsadaan hay'adaha, is-bahaysiyada, iyo iskaashatada ka shaqeyn jirtay barnaamijyada joogtada ah ee cuntada ama kuwa hadaba socda intii lagu guda jiray cudurka COVID-19, oo leh awooda iyo aqoonta ay ku qeybiyaan cunto fara badan si joogto ah oo ayna awood u yeelan karaan:

- Miisaamida iyo xajinta barnaamijyada cuntada jira ama nidaamyada
- Isticmaalaan laacagaha la siiyey inta u dhaxeysa 15ka Janaayo, 2022 ilaa 31ka Oktoobar, 2022.
- Inay ugu yaraan 75% lacagta la siiyey ay ku bixiyaan raashiin. Ugu badnaan 25% oo lacagaha ah ay u isticmaalaan mushaaraadka, faa'idooyinka, alaabaha, iyo qarashaadka dadban.
- Ay ku hagaajiyaan dhamaan lacagaha barnaamijka kaalmada cuntada dadka ku nool ama ka shaqeeyaan King County, Washington
- Ay joogteyaan bixinta qudaarta ama raashiinka:
 - Barnaamijyada lagu bixiyo qudaarta waa inay bulshada heshaa ugu yaraan laba mar bishiiba.
 - Barnaamijyada lagu bixiyo cuntada waa inay bulshada heshaa ugu yaraa sadex mar todobaadkiiba.
- Ay buuxiyaan dhamaan shuruudaha lagu sheegay Qeybta V

Barnaamijyada aan loo isticmaali Karin lacagaha kaalmada cuntada:

- Dhismayaasha maamulka
- Mashaariicda rasal-maalka
- Qiimeynta baahiyaha
- Mashaaric qorsho dejin ah
- libinta kaararka hadiyadaha
- Bixinta foojarada raashiinka
- Ku iibinta alaabta sida (farantijeero, qaboojiyayaal, gawaari, alaabo wax lagu keydiyo, iwm.)

V. Shuruudaha Helitaanka

Codsadayaasha waa inay buuxiyaan shuruudahan soo socda si ay u helaan lacagaha dalwadda dhexe oo lagu bixinayo qaab baraamij kaalmada cuntada oo loo yaqaano ' Food Security Assistance Program':

A. Xaaladaha maaliyadeed: Hay'adaha waa inay ahaadaan:

- Kuwa ku diiwaangashan Washington oo ay ahaadaan urur gaar ah oo faa'ida doon aheen waana inay ahaadaan kuwa haysta aqoonsi fadaraali ah 501(c)(3) oo xaaladaas ku jira. Xaalada codsadaha ee 501(c)(3) oo xaaladaas ku jira waa inay tahay mid si fiican u taagan

waa inaysan ahaanin mid lagala laabtay xaaladaas sanadkii tagay.

- Lahaadaan kafaalo-maalayadeed dhanka 501(c)(3) ee xaalada iyo karti la muujiyey si loo xaqiijiyo habraac maamul iyo mid xisaabeed oo wanaagsan si loo ilaaliyo lacagaha lagu bixiyey magaca Barnaamijka Kaalmada Cuntada ee ' Food Security Assistance Program'
- Ahaadaan urur dadweyne, gudi ama mid ay madaxdu sameeyeyn oo ah RCW 35.21.660 ama RCW 35.21.7301. Xaalada codsadaha sharci ahaan waa inay ahaataa mid wanaagsan waa inaysan noqon mid laga noqday sanadkii tagay

B. Diiwaangelinta SAM: Hay'adaha la siiyey lacagaha ayaa laga rabaa inay yeeshaan diiwaangelin shaqeynaysa taas oo ah diiwaangelin fadaraali ah oo hoos tagta hanaanka 'System for Award Management (SAM)'. Inkastoo oo aan diiwaangelina SAM looga baahnayn codsashada lacagaha, hadana hay'adaha la siiyey lacagaha waxaa laga rabaa inay sameystaan diiwaangelin shaqeysa oo SAM ah kama dambeys 15ka Janaayo, 2022. Si aad u codsato SAM, booqo sam.gov.

C. Adeegyada Macaamiilka iyo Dukumiintiyada: Dhamaan hay'adaha la siiyey qandaraaska waxaa laga rajeynayaa inay keenaan qaabab wanaagsan oo lagu heli karo adeegyada. Sida:

- Hay'adaha waa inaysan u baahan aqoonsi ama cadeyn deganaansho, dhaqaale, tirade qoyska, ama xaalada muwaadin-nimada oo ka imaanaysan bulsho kasta oo qeyb ka ah mashaariicda barnaamijka kaalmada cuntada ee ' Food Security Assistance Program'.
- Soo bandhigida tirada qoyska, cinwaanka, dhaqaalaha, iyo baahiyaha waa in loo ogolaadaa dhamaan bulshooyinka la siinaya kaalmada cuntada ee barnaamijka 'Food Security Assistance Program resources'.
- Hay'adaha waa inaysan u sheegin adeegyada bulshooyinka ay bixiya xogaha ku saabsan iyaga oo ah inay ku nool yihiin King County oo ay qabaan baahiyo cunto.

Ururada hela lacagaha waxaa laga rabaa inay bixiyaan oo ay siiyaan adeegyada dadka iyagoo aanan eegin midabka, jinsiyada, jinsiga, lab ama dhedig, diinta, ama wadanka asalka uu ka soojeeda.

D. Awooda ururka: hay'adaha la siiyey lacagaha waa inay heystaan waxyaabaha ay ku maareyaan qeybinta cuntada tirada badan, waxaana kamid ah waxyaabaha la rabo inay hay'adaha haystaa shaqaalo, keydad cunto, gaadiid, iskaashatada iibinta, iyo xiriiro wanaagsan oo la leeyihiin bulshada. Hay'adaha sidookale waa inay leeyihiin awood maamul si ay u maareyaan lacagaha, sida nidaam xisaabeed oo kala saaraya lacagaha barnaamijka kaalmada cuntada iyo 'Food Security Assistance Program' iyo lacagaha kale ee ururka. Hay'adaha la siiyey lacagaha waxaa laga rabaa inay soo gudbiyaan macluumaad bil kasta oo xambaarsan dukumiintiyada muujinaya sida loo isticmaalayo lacagaha, waqtiga iyo dadaalada la sameynayo iyo koobiga wixii lacagaha la bixiyey iyo risiityada wax lagu soo iibiyey ee bil walba.

E. U Qeybinta Bulshada Dhaqaala Xumada Saameysay: Ujeedka laga leeyahay barnaamijka kaalmada cuntada ee 'King County Food Security Assistance Program' ayaa ah in la kordhiyo helitaanka cuntada oo ay helayaan dadka ay ku habsatay musiibada dhaqaale oo uu sida daran u saameeye cudurka COVID-19.

Kuwaas oo kamid ah sida bulshooyin qabay boqolkiiba 50 qoysaska dhaqaale ka hooseya boqolkiiba 60 Dhaqaalaha Deegaanka Dhexdhexaadka ah kaas oo loo yaqaano 'Area Median Gross Income' ama boqolkiiba 25 kamid qoysaska oo ay haystaan dhaqaale ka hooseeya Heerka Faqrinimada Fadaraalka oo loo yaqano 'Federal Poverty Line'. Codsadayaasha waa inay cadeeyaan inay buuxin karaan mid ama ka badan shuruudahan soo socda oo lagu heli karo lacagaha:

- **Adeegyada cunto qeybinta ee codsadhaha waxaa lagu sameynayaa goobo lagu soo Go'aamiyey Tirakoob Aqooneed.** Isticmaal qariirada waaxda Guriyeynta iyo Horumartinta magaalooyinka ee Mareykanka oo loo yaqaano [interactive online map](#) si aad u hesho Raadka Tirakoob Aqooneedka King County. Geli cinwaan qeybta sare ee bidix dhanka buluuga ah, taabo "Color QCT Qualified Tracts" iyo "Show Tracts Outline", kadib dooro sanadka 2021. Kuwa mashaariicda goobaha faraha badan, ururada waa inay cadeeyaan inta badan ee goobaha inay ku yaalaan Goobta Tirakoob Aqooneedka lagu sheegey.
- **In kabadan 50% macaamiisha heli doona adeegyada cunto qeybinta oo uu bixin doono codsadhaha waa inay ku noolaadaan Goobta Tirakoob Aqooneedka lagu sheegay.** . Isticmaal qariirada waaxda Guriyeynta iyo Horumartinta magaalooyinka ee Mareykanka oo loo yaqaano [interactive online map](#) si aad u hesho Raadka Tirakoob Aqooneedka King County. Geli cinwaan qeybta sare ee bidix dhanka buluuga ah, taabo "Color QCT Qualified Tracts" iyo "Show Tracts Outline", kadib dooro sanadka 2021. Macaamiisha waxay bixin karaan cadeymo shaqsi oo ku saabsan cinwaankooda, lagamana rabo cadeynmo inay goobta degan yihiin si ay u helaan mucaawinada.
- **Adeegyada cunto qeybinta ee codsadhaha waxaa si aasaasi ah loogu talagalay dadka dhaqaalaha hooseeya.** . Macaamiisha waxay bixin karaan cadeymo shaqsi oo ku saabsan cinwaankooda, lagamana rabo cadeynmo inay goobta degan yihiin si ay u helaan mucaawinada.

VI. Shuruudaha lagu helayo lacagaha: Codsiyada waxay gudbi doonaan iyadoo loo tixgelinaayo shuruudahan soo socda:

Shuruudaha	Miisaaniyada
Mashruuc mudnaanta siinaya bulshooyinka dhaqaala xumada uu u geystay kuwaas oo sida daran u saameeyey COVID-19	25%
Mashruuc keenaya qaabab wanaagsan oo damaana-qaadaya helitaan cunto si joogto ah bulshada uu u adeegayo ay heleyso oona laga heley khibrada cunto iibsasashada oo dhaqan ahaan iyo cunto ahaanba u wanaagsan	30%

Codsade oo muujiyey khibrad cunto qeybin iyo awood urureed lagu xajiyo qeybinta cuntada si joogto ah dhamaan mudada qandaraaska uu socdo	20%
Codsade oo muujiyey awooda lagu soo saaro looguna jawaabo falcelinta bulshada ay sameyso	10%

Codsade leh awood maamul iyo khibrada loogu baahan yahay tixraaca iyo diyaarinta dukumiintiyada qarash isticmaalka iyo u hogaansanaanta barnaamijka deeqda	15%
--	-----

United Way waxay hawlgelin doontaa guddi iskaa wax u qabso ah oo sameeya qiimeyn oo soo sheega go'aaminta lacagaha oo u sameeya go'aanada qaab la xiriira Caafimaadka Dadweynaha –shaqaalaha Seattle & King County. United Way iyo Waaxda Caafimaadka Dadweynaha – Seattle & King County waxay xaq u leeyiin go'aankooda inay ku diidaan wax kamid ah ama dhamaan Codsiyada ganaax la'aan. Xulashada u dambeysa ee lagu sameynaya hay'adaha waxay noqon doontaa Codsiyada marka loo eego fikrada United Way iyo Public Health – Seattle & King County kadib marki ay gudiga sameeyaan dib u eegista qiimeynta, midka sida ugu wanaagsan u buuxiya shuruudaha la sheegey ee Codsiyada oo sida dhabta ah u daneynaya dadka dhaqaala xumada saameysay ee King County.

VII. Shuruudaha Warbixnada

Hay'adaha la siiyey lacagaha barnaamijka kaalmada cuntada waxaa laga raba bil kasta warbixin ku soo gudbiyaan email, taas oo ay ku jiraan:

- Dukumiinti faahfaahsan oo qeeyxaya deymaha iyo haraaga lacagaha lagu soo iibiyey cuntada, waqtiga iyo dadaalka iyo dukumiintiyada koobi ah oo sheegaya dhamaan qarashaadka la bixiyey iyo risiityada adeega bisha la qabtay.
- Liis tilmaamaya cuntada la qeybiyey bisha, tirada dadka ka shaqeeyey qeybin kasta iyo tirada cuntada la qeybiyey.
- Xogta dadka bulshada kamidka ah oo loo aaday, taas oo laga soo uruuriyey macaamiisha iyadoo aan cidna la kalifin. Xogaha bulshada oo la codsanayo waxaa kamid ah jinsiyada, tirada qoyska, xaalada guriga, hadii guriga ay caruur joogaan iyo hadii kale iyo hadii ay dad da' ah joogaan guriga.

Inta lagu guda jiro mudada qandaraaska, hay'adaha waxaa looga baahan doonaa inay so gudbiyaan warbixno yaryar oo rubuc ah oo ay ku jiraan adeegyada iyo cuntada la bixinayao, iyo ugu yaraan laba sheeko oo wanaagsan oo ku saabsan laba macaamiil.

VIII. Taariikhaha Muhiimka ah

Codsayaasha waa inay ogaadaan taariikhaha muhiimka ah oo ku saabsan Barnaamijka Kaalmada Cuntada ee Food Security Assistance Program:

- **Nofeembar 10, 2021:** Codsiyada oo Furmaya
- **Diseembar 8, 2021:** Codsiyada oo Xirmaya
- **Janaayo 10, 2021:** Ogeysiiska Kuwa Guuleysta
- **Janaayo 15, 2022 – Oktoobar 31, 2022:** Mudada qandaraaska

IX. Kulamada Warbixinta iyo Caawinaada Farsamada

Kulamo warbixin oo ku saabsan codsiga ayaa la qaban doonaa taariikhaha soo socda. Waxaa si joogta ah u jiri doona turjumid Isbaanish ah dhamaan kulamada warbixinta.

- Nofeembar 15, 10 a.m. [|Link toRegister](#)
- Nofeembar 17, 2 p.m. [|Link toRegister](#)

Wixii caawinaad farsamo oo ku saabsan codsiga, ururada waxay ka soo qeyb gali karaan kulamada xafiiska ee zoom ta kuwaas oo dhacaya taarikhahan soo socda. Is-diiwaangelin hor dhac ah lagama maarmaan ma ahan.

- Nofeembar 29, 10 a.m. – 11 a.m. [|Link toMeeting](#)
- Diseembar 1, 2 p.m. – 3 p.m. [|Link toMeeting](#)
- Diseembar 6, 3 p.m. – 5 p.m. [|Link toMeeting](#)

Kulamada xafiiska ee qadka waxay ku bixi doonaan luuqada English. Si aad u diyaarsato caawinaad dhanka farsamada oo ku baxa luuqada Isbaanishka ama luuqad kale, fadlan email uga dir United Way halkan foodsecurity@uwkc.org.

X. Su'aalo Dheeraad ah

Wixii su'aalo ah oo ku saabsan hanaanka codsiga, fadlan kala xiriir United Way of King County halkan foodsecurity@uwkc.org.

XI. Codsiga

Fadlan codsiga ururkaaga ku soo gudbi qaab onleen adigoo isticmaalaya linkigan hoose: https://fightpoverty.formstack.com/forms/2021FSAP_application. Codsiga waa inuusan dib uga dhicin Arbacada, 8da Diseembar 2021.

Waxaan ku talinaynaa inaad jawaabahaaga ku soo qortid qaabka 'word' ka kadibna aad koobi-guurin aad ku sameyso qeybta codsiga onleen ka ah. Fadlan codsigaaga keliya ku soo gudbi qaab onleen ah. Codsiyada email lada lama aqbali doono. Waxaad heli doontaa email xaqiijin ah marka aad soo gudbiso codsigaaga.

Hadii aad u baahan tahay caawinaad dhanka dhameystirka codsiga onleen ka ah sababo la xiriira luuqada ama caqabado farsamo, waxaad macluumaadkaaga ku soo gudbin kartaa qaab English ah maalinta Jimcaha, 3da Diseembar kuna soo dir email kan foodsecurity@uwkc.org, kadib qof kamid shaqaalaha United Way ayaa xogtaada kuu gelin doona hanaanka onleenka ah.

Wixii tixraac ah, codsiga wuxuu wataa su'aalaha soo socda:

Qeybta 1aad: Xaqiijinta Shuruurd Buuxinta

Qeybta 2aad: Macluumaadka hay'ada ama is-bahaysiga

1. Magaca Ururka
2. Ururkaaga ma leeyahay kafaalo maaliyadeed? Hadii ay haa tahay: fadlan sheeg magaca wakiilka maaliyada.
3. Magaca ugu weyn ee Qandaraaska
4. Cinwaanka Emailka koowaad ee Qandaraaska
5. Talefoonka koowaad ee Qandaraaka
6. Kani ma soo jeedin urur gaar baa ama mid is-bahaysi?
 - Urur Gaar ah

- Is-bahaysi
7. Haduu is-bahaysi yahay: Magacyada hawl-wadeenada is-bahaysiga
 8. Haduu yahay Is-bahaysi: fadlan sheeg magaca iyo cinwaanka email ka ee aasaasiga ah ee urur kasta oo bah-wadaag ah
 9. Hadafka ururka ama is-bahaysiga
 10. Haduu yahay Is-bahaysi: Sharax qaab dhismeedka iskaashiga is-bahaysigaaga, adigoo ku daraya goobta ururkaaga u ah maaliyada kumbiyuutarada iyo sida kooxda ay u qarash gareyn doonto dhanka hawl-wadeenada barnaamihka.
 11. Haduu yahay Is-bahaysi: Waxaan fahansanahay in is-bahaysi uu leeyahay heshiis qoran oo feel ah kaas oo u dhaxeeya halw-wadeenada.
 12. Ururkaaga hada maku diiwaangashan yahay hanaanka fadaraaliga ah System for Award Management (SAM.gov)? hadii ay haa tahay, fadlan sawir shaashada ah oo muujinaya diiwaangelinta SAM soo qaad oo soo dir.

Qeybta 3aad: Sheeko Soo jeedinta

Waan qadarinaa waqtigaaga qiimaha badan. Marka aad ka jawaabayso su'aalahaan hoose, fadlan sheeg maluumaad faahfaahsan oo ku saabsan fikirkaaga jawaabahaagana ha ahaadaan kuwo kooban oo macquul ah. Ku soo dhowow la qabsiga sheekooyinka loo adeegsaday soo jeedino kale.

13. Si kooban u sharax soo jeedinta mashruucaaga cunto qeybinta ah. Sharaxaadaada ku dar waxyaabahan soo socda: nooca cuntada aad qorshenayso inaad qeybiso, goobta iyo inta jeer, iyo goorta aad qeybinayso; iyo bulshooyinka, qowmiyadaha iyo nidaamyada aad qorshesay inaad ku shaqeyso.
14. Meeqa qof oo isku mid ah oo ay hay'adaada ama is-bahaysigaaga gaari doonaa guud ahaan inta u dhaxeysa 15ka Janaayo, 2022 ilaa 31ka Oktoobar, 2022 adigoo isticmaalaya mashruucan lacagta ah? Fadlan si kooban u sharax sida aad uga shaqeysay inta suuragalka ah ee aad gaari karto.
15. Sidee ayey bulshada aad rabto inaad u adeegto uu u saameeyey COVID-19 dhaqaala ahaan? Sidee ayaad u muujin doontaa baahiyahooda yaabka leh ee sababay caabuqa?
16. United Way waxay rabtaa inay qandaraas siiso ururo iyo is-bahaysiyo oo wata qaabab dhib yar oo lagu helayo cunto joogto la siinayo bulshada loo adeegayo. Fadlan sharax sida hada aad u sameysid qaabab dhib yar oo lagu heli karo cuntada iyo qorshayaal cusub oo lagu yareyn karo caqabadaha hortaagan helitaanka cuntada ee barnaamijka hay'ada.
17. Sharax khibarada ururkaaga ama is-bahaysigaaga oo ku saabsan qabashada isdhexgalka iyo bxinta adeegyada cuntada bulshada aad rabto inaad u adeegto. Fadlan bixi tusaalooyin ku haboon Barnaamijka Kaalmada Cuntada.
18. Sidee ayey hay'ada aad hawl-wadeenka tihiin ee arimaha bulshada ay ugu shaqeysay fahamka baahiyaha cutooyinka gaarka u ah dhaqamada? Fadlan sheeg sida aad ku soo saari karto oo aad ugu jawaabi karto falcelinta bulshaada iyadoo la adeegsanayo mashruucan.
19. Describe the resources your agency has in place to support food distribution (such as established cash reserves, staffing, food storage and transport, trusted partnerships, and vendors).
20. Sharax khibradaada maareynta lacagaha fadaraaliga ah. Hadii aadan lahayn

khibrado dhanka maareyna lacagaha fadaraaliga ah.fadlan sheeg khibradahaaga ku saabsan maareynta lacagaha ama deeqda kuwa magaaloooyinka, degmooyinka ama dawlad deegaanka.

Fadlan sharax sida aad u qorsheyn doonto bixinta qarashka, macluumaad diyaarinta iyo sameynta dukumiintiyada iyadoo la raacayo nidaamka deeqda.

21. Is there anything else you would like to share?

Qeybta 4aad: Xogta Bulshada

22. Adoo eegaya garashadaada ugu wanaagsan, fadlan soo gudbi xogta macaamiishabulshada oo ka qeyb qaatay barnaamijyada ururkaaga ama is-bahaysigaaga 12 kii bilood u dambeysay. Hadii aad is-bahaysi wadaag tahay, fadlan soo gudbi qarashaadka guud ee barnaamijyadaada. Hadii aadan soo uruurin xogta macaamiisha oo ku saabsan meel gaar ah, fadlan ku qor "unknown" Oo micnaheedu yahay 'lama ogo'

- Caruurta (18 ka sano iyo ka yar)
- Dadka yaryar (18 ilaa 24 sano)
- LGBTQ+
- Kuwa guri la'aanta
- Dadka da'da ah (60 sano iyo ka weyn)

23. Adoo eegaya garashadaada ugu wanaagsan, fadlan soo gudbi xogta macaamiisha bulshada oo ka qeyb qaatay barnaamijyada ururkaaga ama is-bahaysigaaga 12kii bilood u dambeysay. Hadii aad is-bahaysi wadaag tahay, fadlan soo gudbi qarashaadka guud ee barnaamijyadaada. Hadii aadan soo uruurin xogta macaamiisha oo ku saabsan meel gaar ah, fadlan ku qor "unknown" oo micnaheedu yahay 'lama ogo'

- Soo galootiga Afrikaanka ah
- Ameerikaanka Madow
- Hindida Amerikaanka ah/ Dhaladka Alaska
- Asian (Chinese, Japanese, Korean, etc.)
- South Asian (Indian, Pakistani, Bengali, etc.)
- South East Asian (Thai, Lu Mein, Hmong, Vietnamese, Cambodian, etc.)
- Latinx
- Native Hawaiian/Pacific Islander
- Middle Eastern (Iraqi, Iranian, Saudi, Turkish, etc.)
- Caucasian/White/European Descent
- Jinsiyado Kala duwan
- Lama ogo

Qeybta 5aad: Miisaaniyada

24. Codsiga Tirad Lacagta

25. Fadlan dhameystir faylka hoose ee miisaaniyada, adigoo sheegaya qorshahaaga lacag isticmaalka Barnaamijka Kaalmada Cuntada ee 'Food Security Assistance Program'. Ugu yaraan 75% lacagaha lagu siiyey waa in loo isticmaalaa in lagu soo iibiyo cunto. Ugu badnaan 25% oo lacagaha ah waa in loo isticmaalaa bixinta mushaarka, faa'idada, alaabta, iyo qarashaadka dadban.

- Cuntada
- Mushaarka iyo joornaatiga
- Faaidooyinka dheeriga ah
- Safarada

- Alaabta
- Goobta (kirada, lacagaha isticmaalka hantida, iwm.)
- Suuq-geynta iyo isdhaxgalka
- Heerka dadban

